

Ka difaac ilmahaaga COVID-19

QORAAL

[muusig kicin leh]

[Warin]

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer ayaa hadda loo heli karaa carruurta 5 ilaa 11 jirka ah.

Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurka waxay kula talineysaa carruurta awooda, inay tallaalka qaataan.

Xataa carruurta way qaadi karaan COVID-19, tallaalkuna wuxuu ka caawiyaa dhisida difaaca si carruurta u caafimaad ahaadaan.

Tallaalka COVID-19 waa mid badqab leh, bilaash ah, oo waxtar u leh carruurta.

Tallaalka Pfizer ee carruurta da'doodu tahay 5-11 waa qiyaas ka yar tallaalka Pfizer ee dadka da'doodu tahay 12 iyo ka weyn.

Qiyaasta yar ayaa si ka duwan loo baakadeeyay, markaa waxaad u baahan doontaa inaad aado goob tallaalka oo tallaalkan haysa.

Tallaalka COVID-19 ma sababo jirro.

Tallaalka COVID-19 wuxuu qoysaska ka difaaca COVID-19.

Ilmahaagu wuxuu u baahan doonaa laba kuurood oo tallaalka COVID-19 ah si difaac buuxa uu u helo.

Sug 3 toddobaad inta u dhaxaysa qaadashada kuurooyinka koowaad iyo labaad.

Ilmahaaga si buuxda ayuu difaac u hasytaa laba toddobaad kadib kuurada labaad.

La hadal bixiye daryeel caafimaad haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Khadka tooska ah ee MDH ayaa sidoo kale laga heli karaa 1-833-431-2053.

[muusig kicin leh]

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

11/16/21 (Somali)

Si aad xogtan ugu hesho qaab kale, wac: 651-201-4989